

# WAXBARASHADA BILAASHKA EE SURAGALINAYSA IN DAD BADAN EE REER MINNESOTA AY JAAMACADDA DHIGTAAN.

## Taasi waa ballanqaadka North Star Promise.

North Star Promise waxaa loo abuuray in lagu bixiyo waxbarasho bilaash ah iyo khidmadaha si waxbarashada dugsi sare ka dib ay suurtagal ugu noqoto ardayda iyo qoysaska Minnesota.

### So qalin jabi. Shahaado hel. Xirfad baro.

Dhammaan mac-hadyada waxbarashada sare ee dadweynaha Minnesota iyo kulliyadaha Qabiilooyinka ayaa lagu heli karaa waxbarasho bilaash iyada oo loo marayo North Star Promise. Waxbarasho ah iyo khidmadaha bilaash ayaa la heli karaa:

- **Dhammaan Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota**
- **Dhammaan xarumaha Jaamacadda Minnesota**
- **Dhammaan Kulliyadaha Qabiilooyinka**

Barnaamijka North Star Promise wuxuu u furan yahay dhammaan dadka deggan Minnesota ee leh Dakhliga Guud ee (AGI) ee qoysaska dakhligooda ka hooseeya \$80,000, sida ku cad Free Application for Federal Student Aid (Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayda Federaalka) (FAFSA) ama Codsiga Sharciga Riyada ee Minnesota (Minnesota Dream Act Application).

### Galista Kulliyadaha maha in ay noqoto galis dayn badan.

Sii waditanka waxbarashadaada waxay kaa caawin kartaa in nololaha ay horumarto oo aad wax badan sameyso, khasatan iyadoo ayna jirin deyn oo caqabadeed dib kuu qabata. Barnaamijka North Star Promise wuxuu daboolaa ilaa 100% kharashka waxbarashadaada iyo khidmadaha lagama maarmaanka ah wuxuuna kaa caawinayaa inaad hesho waxbarashada aad rabto iyada oo aanad gelin deyn weyn.

Qaddarka saxda ah ee maalgelinta aad heli karto waxaa lagu xisaabiyaa habka “doollarka-ugu-dambeeya.” Tani waxay ka dhigan tahay inay daboolayso kharashkaaga soo haray ee waxbarashada iyo khidmadaha ka dib marka dhammaan kaalmooyinka kale la bixiyo (sida deeqaha waxbarasho, deeqaha, taageerada iyo ka-dhaafitaanka waxbarashada). Amaahda iyo barnaamijyada shaqada iyo waxbarashadu ma saamaynayaan qaddarka maalgelinta aad heli karto. North Star Promise ma daboolo kharashyada sida hoyga, cuntada, gaadiidka, buugaagta iyo alaabada.

### WAXBARASHADA BILAASHKA AH WEY KAA CAWINEYSAA INAAD WAXBARASHADAADA SI KASTA U SII WADATO.

- **Hiigso shahaado afarsano ah, baro xirfad ama hel xirfad shahaado**
- **North Star Promise maaha barnaamij ku xidhan barnaamij khaasa ama takhasus gooni ah**
- **Abaalmarintu kuma salaysna xulashada barnaamijyo, xirfado ama shahaadooyin gooni ah**
- **Fasallada qayb laga dhigto iyo kuwa fidkiiba way ku jiraan**
- **Iska diiwaangeli oo qaado ugu yaraan hal dhibcood si aad ugu qalmatid**
- **U-Furan ardayda cusub iyo kuwa soo laabanaya ee buuxiya shuruudaha u-qalmidda**



## Sida loo codsado waxbarasho iyo khidmadaha bilaashka ah iyada oo loo marayo North Star Promise.

Si aad u dalbato lacagaha North Star Promise, buuxi foomamka FAFSA ama Minnesota Dream Act. Codsigu wuxuu u baahan doonaa inaad taxane qorto mac-hadyadda aad qorsheynayso inaad wax ka dhigato si aad shahaado ama shahaado xirfadeed u hesho. Haddii adiga iyo qoyskaaga aad u qalantaan, oo aad dhigato jaamacad ama kulliyad u qalanta, mac-hadyadda ayaa ku siin doonta waxbarasho iyo khidmadaha bilaashka ah oo qayb ka ah dalabkaaga kaalmada dhaqaale.

Shuruudda kaliya ee tacliinta helitaanka waxbarashada bilaashka ah, waa inaad sii wadato aadna buuxiso heerarka Horumarka Tacliimeed ee dugsiigaaga (SAP), taas oo micnaheedu tahay inaad ku socoto waddada saxda ah si aad u hesho shahaado ama shahaado xirfadeed.

Ardayda qaadana shahaadada labada-sano waxay heli karaan abaalmarinta illaa afar semester oo buuxa ama u dhiganta. Ardayda qaadana shahaadada afar-sano waxay heli karaan abaalmarinta illaa sideed semester oo buuxa ama u dhiganta.

## Shuruudaha U Qalmidda Oo Dhameystiran

- ✓ Degane Minnesota ah
- ✓ Ku lahaan Dakhliga Guud ee La Habeeyay (AGI) ee qoyska sida ku cad Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayda Federaalka (Free Application for Federal Student Aid FAFSA) ama Codsiga Sharciga Riyada ee Minnesota (Minnesota Dream Act Application) oo ka hooseeya \$80,000
- ✓ Ku jirta ama dhigata mac-had waxbarasho sare oo Minnesota ah ama kooliyad Qabiileed
- ✓ Ku diiwaangashan tahay oo qaadato ugu yaraan hal dhibcood
- ✓ Ku diiwaangashan tahay barnaamij ama koorso waxbarasho ee shahaado u gaar ah, diblooma, ama shahaado xirfadeed
- ✓ Buuxi heerarka Horumarka Tacliimeed ee dugsiigaaga Ku Qanacsan yahay (SAP)

- ✓ Aan horey u helin shahaado bajulaarka (afar-sano), oo ay ku jiraan shahaadooyinka lagu helay dal shisheeye
- ✓ Aan ku jirin amaahda ardayga ee gobolka ama federaalka oo lagu guuldaraystay

## JAAMACADAHA & KULLIYADAHA U QALMA

MINNESOTA STATE COLLEGES AND UNIVERSITIES  
[www.minnstate.edu](http://www.minnstate.edu)

UNIVERSITY OF MINNESOTA CAMPUSES  
[www.system.umn.edu](http://www.system.umn.edu)

### TRIBAL COLLEGES

Fond du Lac Tribal and Community College  
[www.fdlc.edu](http://www.fdlc.edu)

Leech Lake Tribal College  
[www.lltc.edu](http://www.lltc.edu)

Red Lake Nation College  
[www.rlnc.edu](http://www.rlnc.edu)

White Earth Tribal and Community College  
[www.wetcc.edu](http://www.wetcc.edu)

## WIXII FAAHFAAHIN DHEERAAD AH:

[www.ohe.state.mn.us/northstarpromise](http://www.ohe.state.mn.us/northstarpromise)  
[NorthStarPromise.OHE@state.mn.us](mailto:NorthStarPromise.OHE@state.mn.us)